

## **MRSA - Macluumaadka bukaanka**

Mid ka mid ah baaritaanadaada ayaa muujinaya inaad qabto bakteeriyo loo yaqaano Meticillin Resistente Staphylococcus Aureus (MRSA). Si fudud looguma daawayn karo antibiyootiga. Markaa inta aad isbitaalka ku jirto, waxaa jiri doona tallaabooyin gaar ah oo adiga ku khuseeya si looga hortago ku faafitaanka bukaanada kale. Waxaan rajaynaynaa in macluumaadkani ku fahamsiiyo sababta loogu baahan yahay tallaabooyinka noocan ah.

## **Waa maxay MRSA?**

MRSA waa bakteeriyo ah staafolekokes (staphylococci) oo jaale ah oo u adkaysta dhowr nooc oo antibiyootik ah. Bakteeriyada staafolekokes ee jaallaha waa bakteeriyo laga helo dad badan maqaarka jidhkooda iyo sankahooda. Sida caadiga ah qofku ma dareemayo inay jidhkisa ku jiraan, laakiin marmar waxay keeni karaan infekshan, oo caadi ahaan ah infekshannada maqaarka ama nabarro.

## **MRSA khatar ma tahay?**

Infekshannada MRSA ay keento maaha kuwo markasta ka khatar badan infekshannada staafolekokeska kale ee jaalaha ah, laakiin waxay u baahan yihiin in lagu daweeyo noocyo kale oo ah antibiyootiga. Maadaama infekshannada MRSA ay adkaan karaan in la daweeyo, ma rabno inay ku faafto isbitaallada.

## **Sidee ku qaaday MRSA?**

Way adkaan kartaa in laga jawaabo, laakiin waxaan ognahay in gelitaanka cisbitaallada wadamada ka baxsan wadamada Waqooyiga Yurub, ama in antibiyootiga la isticmaalo muddo dheer, ay yihiin waxyaabo kordhinaya khatarta qaadista. Bakteeriyadu waxay ku faaftaa is taabashada tooska ah ee dadka. Waxaa sidoo kale la isku qaadiin karaa is taabashada aan tooska ahayn sida gacanka albaabka, badhanka nalka laga daaro, maryaha iyo meelaha la midka ee dadku wada taabto.

## **MRSA ma la daweyn karaa?**

In MRSA ku jirto jidhka qofka, inta badan cudur ma keento. Haddii aad qaaddo infekshanka MRSA, waa inaan taas ogaano oo aanu daawaynta antibiyootiga ka dhigno mid habboon. Mararka qaarkood, MRSA si kedis ah ayay uga baxdaa jidhka. Haddii kale, waxaa la tijaabin karaa in daaweyn oogada ah la sameeyo si looga saaro bakteeriyada. Daaweynta oogada ee noocan oo kale ah waxaa soo jeedin kara daaweeyahaaga marka uu kula tashado.

## **Maxay sameeyaan shaqaalaha caafimaadku si ay uga hortagaan faafitaanka MRSA?**

Haddii laga shakiyo ama la xaqiijiyo inaad qabto MRSA, waa inaad qol kuu gaar ah joogtid markaad joogtid isbitaallada, si looga hortago ku faafitaanka bukaanada kale. Shaqaaluhu waxay isticmaali doonaan qalabka la isku ilaaliyo sida galoofisyada, jaakad jaale ah iyo af-dabool (maaskaro). Waa muhiim in qof kastaa nadiifiyo gacmaha marka ay soo galayaan qolkaaga iyo marka ay ka baxayaan. Xarumaha dadka lagu xanaaneeyo waxay leeyihiin nidaamyo u gaar ah MRSA. Dad booqashada ku yimaada waa in lagu wargeliyo, oo ay raacaan nidaamka xarunta.

### **Maxaad samaynaysaa markaad guriga tagto?**

- In gacmaha si wacan loo nadiifiyo iyadoo la isticmaalayo aalkolada nadiifinta gacmaha ama gacmaha lagu dhaqo saabuun iyo biyo ayaa ah waxa ugu muhiimsan ee lagaga hortagayo faafitaanka bakteeriyada MRSA.

- Haddii dad kale gurigaaga kula deggan yihiin, waxaa laga yaabaa inay habboon tahay in la baaro xubnaha kale ee qoyska si loogu sameeyo daawaynta oogada jidhka

*Daawaynta oogada jidhka ayaa si gaar ah lagu talinayaa haddii adiga ama dadka guriga kula deggan ka shaqeeyaan adeegyada caafimaadka, ama haddii qofku qabo cudur kale oo keenaya inuu xiriir badan la yeesho adeegyada caafimaadka. Haddii aadan ka shaqayn adeegyada caafimaadka, waxaad u noolaan kartaa oo aad u shaqaynsan kartaa si caadi ah. Carruurta qabta/sida MRSA waxay si caadi ah u aadi karaan dugsiga barbaarinta (barnehage) iyo dugsiga/iskuulka.*

- Sheeg inaad qabtid MRSA markasta kasta oo aad tagtid ama la xiriirtid goobaha caafimaadka iyo caafimaadka ilkaha. Markaa waxaa la samayn karaa tallaabooyin ka hortag ah, si looga hortago faafitaanka.